



## Somali Senate

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

**UJEEDDO: BAAHIN SHAQO:**

**AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA, MAALIYADD IYO SAHAQAALAHA**

**TIXRAAC SHAQO LAMBAR: 001**

**CODSIGA SHAQADA WAXA UU FURAN YAHAY:**

**18 April – 24 April 2017**

**EMAIL: [senatesom@gmail.com](mailto:senatesom@gmail.com)**

**Waajibaadka Agaasimaha Waaxda Maamulka, maaliyadda iyo shaqaalaha**

- Hoggaaminta waaxda maamulka, maaliyadda iyo shaqaalaha Golaha iyo hubsashada suura-galinta adeeg tayo leh oo ka jawaabayo baahida Golaha.
- Diyaarinta iyo isku duba-ridka xilka iyo masuuliyadda waaxda.
- Maaraynta shaqaalaha waaxda maamulka, maaliyadda iyo shaqaalaha ee Golaha sidii loo horumarin lahaa isku jaangoynta baahida Golaha iyo qorshahayaasha suura galka ah.
- Hanashada maaraynta shaqaalaha iyo u warbixinta xog-hayaha guud, ku xigeenkiise iyo guddonka golaha.
- Isu dheelli tirista miisaaniyadda iyo dakhliga uu heli karo Golaha.
- U qeybinta waajibaadka shaqo xubnaha waaxda si isu dheelli tiran.

### Address

KM-0 Shibis Dist, Banaadir Mogadishu-  
Somalia

### Contacts

Email: [info@senate.gov.so](mailto:info@senate.gov.so) - [senatesom@gmail.com](mailto:senatesom@gmail.com)  
[www.senate.gov.so](http://www.senate.gov.so)





## Somali Senate

- Xoojinta xiriirka wada-shaqeynta Golaha la leedahay hayadaha kale ee dowladda iyo kuwa caalamiga ah ee wadashaqeynta kala dhaxeeyso Golaha isagoo la kaashanaya Xoghayaha Guud.
- Diyaarinta kaarto (istiraatiijiyad) guud oo ay ku maarayso shaqaalaha iyo maalka Golaha iyo dhaqan galinta iyo raacista xeerarka iyo sharciyada u yaalla shaqaalaha dalka.
- Hubsashada iyo daba-galka qabsoomidda iyo hir-galinta hawlaha waaxda.
- Diyaarinta warbixin xilliyeed, sanadeed, ku saabsan gudashada shaqo, guulaha, horumarinta iyo caqabadaha.
- La socoshada go'amada ka yimaada wasaaradda maaliyadda iyo u gudbinta go'amadaa qaybaha kale.
- Waxii shaqo ah ee kale ee ay u xilsaaraan madaxda Golaha.
- Diyaarinta iyo horumarinta hab-socodka iyo siyaasadaha Golaha ee ku aaddan maaliyadda, shaqaalaha iyo heshiiska shaqo bixin.
- Diyaarinta warbixinnada maaliyadeed, shaqaale iyo maamul ee Golaha, sidoo kale; diyaarinta warbixinnada ku socdo wasaaradda maaliyadda, hayadaha caalamiga ah ee nala shaqeeya iyo guud ahaan qaybaha kala duwan ee dowladda.
- Dajin nidaam hab-xisaabeedka maaliyadeed ee Golaha.
- Habaynta iyo diyaarinta miisaaniyadda Golaha iyada oo lala kaashanayo waaxda qorshaynta iyo dhinacyada ay khusayso.
- Diyaarinta dukumintiyada lacagaha lagu qaado iyo maaraynta jeegagga Golaha.
- Ilaalinta sharciyada lagu maamulo misaaniyadda Golaha ama xakamaynta dukumintiyada kaabaya lacag bixinta iyo warbixinnada xisaabaadka ogolaashada lacag bixinta.
- Diyaarinta foojarrada iyada loo la kaashanayo ka warqabka iyo hagidda madaxda sare ee Golaha.
- Samaynta iyo baxnaaninta xeer-hoosaadyada lagu dhaqayo maaliyadda Golaha.
- Samaynta xisaab xir bille, 3 bille, 6 bille iyo sanadle ah ee Golaha.
- Diiwaan galinta hantida guurtada iyo ma-guuratada ee Golaha iyo ka warqabka waxii ku soo kordha ama iska dhima.

### Address

KM-0 Shibis Dist, Banaadir Mogadishu-  
Somalia

### Contacts

Email: [info@senate.gov.so](mailto:info@senate.gov.so) - [senatesom@gmail.com](mailto:senatesom@gmail.com)  
[www.senate.gov.so](http://www.senate.gov.so)





## Somali Senate

- Tixraac u samaynta waraaqaha ka baxa Golaha iyo qaybaheeda kala duwan.
- Waxii shaqo ah ee kale ee ay u xilsaaraan madaxda Golaha.

### Shuruudaha looga baahan yahay

- Inuu Soomaali yahay, dhimirkiisu dhan yahay, aan danbe maxkamad xukuntey galin isla markaana da'diisa ka yareyn 25 sano
- Ugu yeraan shahaada 2aad ee jaamacada (master degree) oo la xiriirta maamulka iyo maareynta, maaliyadda, xisaabaadka ama wax u dhigma.
- Inuu lee yahay ugu yeraan 3 sano oo khibrad shaqo ah oo la xiriirta howlaha maamulka, maaliyadda iyo xisaabaadka.
- Inuu ku hadli karo islamarkaana qori karo luuqadaha Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiriiska
- Inuu lee yahay aqoon uu si fiican ugu adeegsan karo aaladda Komputerka.

### Sida Loo soo codsanayo

Dadka daneynaya waxay ku soo codsan karaan qaab online ah oo keliya. Waxaa lala soo xiriirayaa oo keliya dadka ku soo baxa liiska gaaban. Fadlan ku soo dir codsigaaga, Taariikh nololeedkaaga iyo nuqul shahaadooyinkaaga ka mid ah emailkan: [senatesom@gmail.com](mailto:senatesom@gmail.com). Fadlan cinwaanka codsigaaga ka dhig jagada aad soo codsanayso iyo numberka tixraaceeda. Gabdhaha leh takhasuska iyo khibrada loo baahan yahay waxaa lagu boorinayaa inay soo codsadaan ugu danbeyn codsigaaga soo dir 24April 2017 4:00pm.

#### Address

KM-0 Shibis Dist, Banaadir Mogadishu-  
Somalia

#### Contacts

Email: [info@senate.gov.so](mailto:info@senate.gov.so) - [senatesom@gmail.com](mailto:senatesom@gmail.com)  
[www.senate.gov.so](http://www.senate.gov.so)

